# Baaqa Xuquuqda Daryeelka Caafimaadka ee Deggenayaasha

## XARUMAHA NOLOL-KORMEERAN SIDA KU CAD SHURUUCDA MINNESOTA 144.651

## Ujeeddada Sharci-dejinta

Ujeeddada sharci-dejinta iyo hadafka qodobkan waa in la horumariyo danaha iyo fayo-qabka deggenayaasha xarumaha daryeelka caafimaadka. Ma jiro xarun daryeel caafimaad oo ku khasbi karta deggenaane inuu ka tanaasulo xuquuqdan si shuruud loogu oggolaado gelitaanka xarunta. Ilaaliyaha (guardian) ama mas'uulka hantida (conservator) ee deggenaane, ama haddii uusan jirin ilaaliye ama mas'uul hanti, qof daneeya, ayaa codsan kara fulinta xuquuqdan isagoo wakiil ka ah deggenaha. Qof daneeya waxa kale oo uu codsan karaa fulinta xuquuqdan isagoo wakiil ka ah deggenaane leh ilaaliye ama mas'uul hanti, isagoo adeegsanaya hay'adaha maamul ama maxkamadda degmo ee leh awoodda sharciyeed ee arrimaha ilaalinta iyo mas'uuliyadda hantida. Inta lagu jiro go'aaminta dacwad ku saabsan fulinta xuquuqdan, xarunta daryeelka caafimaadku waxay si daacadnimo leh ugu hoggaansami kartaa tilmaamaha ilaaliyaha ama mas'uulka hantida.

Ujeeddada qodobkani waa in la hubiyo in xorriyadaha madaniga ah iyo kuwa diimeed ee deggenaane kasta—oo ay ku jirto xaqa go'aan-qaadasho shaqsiyeed oo madaxbannaan iyo helitaanka aqoon ku saabsan xulashooyinka la heli karo—aan lagu xadgudbin, isla markaana xaruntu ay dhiirrigeliso oo ka caawiso isticmaalka buuxa ee xuquuqdan inta suurtagal ah.

## Qeexitaanno

Ujeeddooyinka qodobkan awgood, "deggenaane" waxa loola jeedaa qof lagu soo daray xarun loo haysto shati ahaan xarun nolol-kormeeran sida ku cad Xeerarka Minnesota, qaybaha 4665.0100 ilaa 4665.9900.

## Baaqa Siyaasadda Guud

Waxaa lagu dhawaaqayaa in ay tahay siyaasadda guud ee gobolkan in danaha deggenaane kasta la ilaaliyo, iyada oo loo marayo bayaanka xuquuqda bukaanka, kaas oo ay ku jiri doonaan—laakiin aan ku koobnaan—xuquuqda ku xusan qodobkan.

## Macluumaad ku saabsan xuquuqda

Deggenayaasha waa in, marka la qaabilayo, lagu wargeliyaa in ay jiraan xuquuqo sharci ah oo loogu talagalay ilaalintooda inta ay ku sugan yihiin xarunta ama inta lagu jiro muddada daaweyntooda iyo daryeelkooda ee bulshada, isla markaana xuquuqdaas lagu sharxay qoraal la socda oo qeexaya xuquuqda iyo waajibaadka khuseeya ee ku xusan qodobkan. Habayn macquul ah waa in loo sameeyaa dadka leh naafonimada isgaarsiinta iyo kuwa ku hadla luqad aan ahayn Ingiriisi. Siyaasadaha hadda jira ee xarunta, natiijooyinka kormeerka ee hay'adaha caafimaadka ee heer gobol iyo heer deegaan, iyo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan qoraalka xuquuqda waa in ay u heli karaan deggenayaasha, ilaaliyeyaashooda, ama wakiillada ay doorteen marka ay si macquul ah uga codsadaan maamulaha ama shaqaale kale oo loo xilsaaray, si waafaqsan cutubka 13, *Xeerka Hab-dhaqanka Xogta*, iyo qodobka 626.557 ee la xiriira dadka nugul.

## Daryeel edeb iyo ixtiraam leh

Deggenayaashu waxay xaq u leeyihiin in si edeb leh oo ixtiraamaya shakhsiyaddooda loola dhaqmo, taas oo ay sameeyaan shaqaalaha ama dadka bixiya adeegyada ee xarunta daryeelka caafimaadka.

## Daryeel caafimaad oo ku habboon

Deggenayaashu waxay xaq u leeyihiin daryeel caafimaad iyo mid shakhsiyeed oo ku habboon, kuna salaysan baahidooda gaarka ah. Daryeel ku habboon waxa loola jeedaa daryeel loo qaabeeyey in uu u suurtageliyo deggenayaasha in ay gaaraan heerka ugu sarreeya ee suurtagalka ah ee awooddooda jireed iyo maskaxeed. Xuquuqdan waa la xaddidi karaa marka adeegga aan laga magdhabin kheyraad dadweyne ama mid gaar loo leeyahay.

## Aqoonsiga dhakhtarka, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka.

Deggenayaashu waa in ay helaan ama la siiyo, qoraal ahaan, magaca, cinwaanka ganacsi, lambarka taleefanka, iyo takhasuska (haddii uu jiro) ee dhakhtarka, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka ee mas'uulka ka ah isku-duwidda daryeelkooda. Haddii xaalad caafimaad awgeed aanay habboonayn in macluumaadkan la siiyo deggenaha—sida lagu diiwaangeliyey diiwaanka daryeelka deggenaha ee dhakhtarka, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka—macluumaadkaas waa in la siiyaa ilaaliyaha deggenaha ama qof kale oo deggenuhu u doortay wakiil ahaan.

## Xiriirka la leh adeegyada kale ee caafimaadka

Deggenayaasha qaata adeegyo ka imanaya bixiye dibadeed waxay xaq u leeyihiin, marka ay codsadaan, in lagu wargeliyo aqoonsiga bixiyahaas. Deggenayaasha waa in qoraal ahaan loogu wargeliyaa adeeg kasta oo daryeel caafimaad ah oo ay u fuliyaan shaqsiyaad, shirkado, ama ururro aan ahayn xaruntooda. Macluumaadku waa in uu ka koobnaadaa magaca bixiyaha dibadda, cinwaanka, iyo sharaxaad ku saabsan adeegga la bixin karo. Haddii xaalad caafimaad awgeed aanay habboonayn—sida lagu diiwaangeliyey diiwaanka daryeelka deggenaha ee dhakhtarka, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka—macluumaadkaas waa in la siiyaa ilaaliyaha deggenaha ama qof kale oo deggenuhu u doortay wakiil ahaan.

## Macluumaad ku saabsan daaweynta

Deggenayaasha waa in ay ka helaan dhakhtarkooda, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka macluumaad dhammeystiran oo casri ah oo ku saabsan ogaanshahooda, daaweyntooda, beddelka daaweynta, khataraha, iyo saadaasha xaaladdooda, sida uu qabo waajibaadka sharciyeed ee dhakhtarka, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka ee ku aaddan bixinta macluumaadkan. Macluumaadkan waa in lagu bixiyaa erayo iyo luqad ay deggenayaashu si macquul ah u fahmi karaan. Deggenayaashu waxa ay la socon karaan xubin qoyska ka mid ah ama wakiil kale oo ay doorteen, ama labadaba. Macluumaadkani waa in uu ka mid noqdaa natiijooyinka caafimaad ama kuwa nafsiyeed ee waaweyn ee la filan karo ee ka dhalan kara daaweynta iyo beddelkeeda. Haddii ay caafimaad ahaan ku

habboonayn in macluumaadkan la siiyo deggenaha—sida lagu diiwaangeliyey diiwaanka caafimaad ee deggenaha ee dhakhtarka, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka—macluumaadkaas waa in la siiyaa ilaaliyaha deggenaha ama qof kale oo deggenuhu u doortay wakiil ahaan.

Shakhsiyaadku waxay xaq u leeyihiin inay diidaan helitaanka macluumaadkan.

Deggenaane kasta oo la ildaran nooc kasta oo kansarka naasaha ah waa in si buuxda loogu wargeliyaa, ka hor ama waqtiga gelitaanka iyo inta uu ku jiro joogitaankiisa, dhammaan hababka kale ee wax-ku-oolka ah ee daaweynta ee uu ogyahay dhakhtarka daawaynaya, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka. Tan waxa ku jira daaweynta qalliin, shucaac (radiology), ama kiimiko-daawo (chemotherapy), ama isku-darrooyin daaweyn ah, iyo khataraha la xiriira mid kasta oo ka mid ah hababkaas.

## Ka-qaybgalka qorshaynta daaweynta; wargelinta xubnaha qoyska

1. Deggenayaasha waxay xaq u leeyihiin inay ka qaybgalaan qorshaynta daryeelkooda caafimaad. Xuquuqdan waxa ku jira fursadda lagula hadlo daryeel-bixiyeyaasha gaarka ah ee ku saabsan daaweynta iyo beddelkeeda, fursadda lagu codsado laguna ka-qaybgalo shirarka rasmiga ah ee daryeelka, iyo xaqa lagu darayo xubin qoyska ka mid ah ama wakiil kale oo ay doorteen, ama labadaba. Haddii deggenuhu aanu awoodin inuu goob-joog noqdo, xubin qoys ama wakiil kale oo uu deggenuhu doortay ayaa lagu dari karaa shirarka noocaas ah. Wakiilka la doortay waxa ka mid noqon kara *doula* uu bukaanku doorto.
2. Haddii deggenaha marka uu xarunta soo galo uu miyir la' yahay, ku jiro xaalad *coma*, ama aanu awoodin inuu isgaarsiiyo, xaruntu waa inay samayso dadaallo macquul ah—sida ku cad farqadda (a)—si ay u wargeliso xubin qoys ama qof qoraal ahaan uu deggenuhu u magacaabay in lala xiriiro marka ay jirto xaalad degdeg ah, in deggenaha la geeyey xarunta. Xaruntu waa inay u oggolaataa xubinta qoyska ka-qaybgalka qorshaynta daaweynta, ilaa ay xaruntu ogaatay ama ay sabab macquul ah u leedahay inay rumaysato in deggenuhu leeyahay *tilmaamo hore* (advance directive) oo wax kale tilmaamaya, ama ay ogaatay in deggenuhu qoraal ahaan u cadeeyey inuusan rabin in xubin qoys lagu daro qorshaynta daaweynta. Ka dib marka xubin qoys la wargeliyo, balse ka hor inta aan loo oggolaan ka-qaybgalka qorshaynta daaweynta, xaruntu waa inay samayso dadaallo macquul ah—iyadoo raacaysa dhaqanka caafimaad ee macquulka ah—si ay u ogaato in deggenuhu sameeyey *tilmaamo hore* oo khuseeya go'aamada daryeelkiisa caafimaad. Ujeeddooyinka farqaddan awgood, "dadaallo macquul ah" waxa ka mid ah:
    a. baarista alaabta shakhsiga ah ee deggenaha;
    b. baarista diiwaannada caafimaad ee deggenaha ee ku jira gacanta xarunta;
    c. waydiinta qof kasta oo lala soo xiriiray xaalad degdeg ah ama xubin qoys oo lala xiriiro sida ku cad qodobkan, in deggenuhu sameeyey tilmaamo hore iyo in uu leeyahay dhakhtar, kalkaalisad heer sare oo diiwaangashan, ama kaaliye dhakhtar uu caadi ahaan u aado daryeel; iyo
    d. waydiinta dhakhtarka, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka ee uu deggenuhu caadi ahaan u aado daryeel—haddii la yaqaan—in deggenuhu sameeyey tilmaamo hore. Haddii xaruntu wargeliso xubin qoys ama qof loo qoondeeyey xiriir degdeg ah, ama ay u oggolaato xubin qoys ka-qaybgalka qorshaynta daaweynta sida ku cad farqaddan, xaruntu mas'uul kama aha waxyeello magdhow ah oo uu deggenuhu ku doodo in wargelinta ama ka-qaybgalka xubinta qoyska uu ahaa mid aan habboonayn ama jebiyey xuquuqda asturnaanta deggenaha.

3. Marka ay samaynayso dadaallo macquul ah oo lagu wargelinayo xubin qoys ama qof loo qoondeeyey xiriir degdeg ah, xaruntu waa inay isku daydaa inay aqoonsato xubnaha qoyska ama qofka loo qoondeeyey xiriirka degdegga ah iyadoo baadhaysa alaabta shakhsiga ah ee deggenaha iyo diiwaannada caafimaad ee deggenaha ee ku jira gacanta xarunta. Haddii xaruntu ku guuldareysato inay wargeliso xubin qoys ama qof loo qoondeeyey xiriir degdeg ah 24 saacadood gudahood ka dib gelitaanka, xaruntu waa inay wargelisaa hay'adda adeegyada bulshada ee degmada ama hay'adda fulinta sharciga ee deegaanka in deggenaha la geeyey xarunta isla markaana aan la awoodin in la wargeliyo xubin qoys ama qof loo qoondeeyey xiriir degdeg ah. Hay'adda adeegyada bulshada ee degmada iyo hay'adda fulinta sharciga ee deegaanka waa inay ka caawiyaan xarunta aqoonsiga iyo wargelinta xubin qoys ama qof loo qoondeeyey xiriir degdeg ah. Hay'ad kasta oo ka caawisa xarunta hirgelinta qaybtan mas'uul kama aha waxyeello magdhow ah oo uu deggenuhu ku doodo in wargelinta ama ka-qaybgalka xubinta qoyska uu ahaa mid aan habboonayn ama jebiyey xuquuqda asturnaanta bukaanka.

## Qof taageero loo qoondeeyey

1. Iyadoo la raacayo farqadda (3), xarunta waa inay ugu yaraan u oggolaataa hal qof oo taageero loo qoondeeyey, kaas oo deggenuhu doorto, inuu si jireed ula joogo deggenaha waqtiyada uu deggenuhu doorto inta uu deggenuhu ku nool yahay xarunta.
2. "Qof taageero loo qoondeeyey" waxa loola jeedaa qof kasta oo uu deggenuhu doorto si uu u siiyo raaxo iyo taageero, oo ay ku jiraan—laakiin aan ku koobnayn—xaaska deggenaha, lammaanihiisa, xubin qoys, ama qof kale oo xiriir dhow la leh. *Doula*-yo shahaado haysta iyo umulisooyin dhaqameed lama tirinayo xadka hal qof ee taageero loo qoondeeyey.
3. Xaruntu waxay xaddidi kartaa ama mamnuuci kartaa joogitaanka qofka taageerada loo qoondeeyey gudaha qolalka daaweynta, qolalka hawlgallada, iyo qolalka qalliinka marka xaddididda ama mamnuuciddu si adag ugu baahan tahay buuxinta heerka daryeelka ee ku habboon. Xaruntu sidoo kale way xaddidi kartaa ama mamnuuci kartaa joogitaanka qofka taageerada loo qoondeeyey haddii qofkaasi u dhaqmo si rabshad leh ama hanjabaad ah oo ku wajahan dadka kale. Xaruntu waxay xaddidi kartaa joogitaanka qofka taageerada loo qoondeeyey ee deggenaha ilaa heerka lagama maarmaanka ah si loo hubiyo in qofka taageerada loo qoondeeyey ee aan deggenaha ahayn uusan si ku-meel-gaar ah ama waqti-dheer ugu noolaan xarunta. Xaddidid kasta ama mamnuucid kasta oo ay xaruntu ku samayso qofka taageerada loo qoondeeyey waxa ay hoos imanaysaa nidaamka cabashada gudaha ee qoraalka ah ee xarunta.

## Joogteynta daryeelka

Deggenayaasha waxay xaq u leeyihiin in lagu daryeelo si joogto ah oo macquul ah, isla markaana ay jirto joogteyn ku filan oo ku saabsan shaqaalaha loo xilsaaray, inta ay siyaasadda xaruntu oggolaanayso.

## Xaqa diidmada daryeelkare

Deggenayaasha leh karti buuxda (aqoon iyo garasho) waxay xaq u leeyihiin inay diidaan daaweynta. Deggenayaasha diida daaweyn, daawo, ama xaddidaadyo cunto waa in lagu wargeliyaa natiijooyinka caafimaad ama kuwa nafsiyeed ee waaweyn ee la filan karo ee ka dhalan kara diidmadaas, iyadoo arrintaas

lagu diiwaangelinayo diiwaanka caafimaad ee shakhsiga. Haddii deggenuhu aanu awoodin inuu fahmo xaaladda, balse aan sharci ahaan loo go’aamin inuusan karti lahayn, ama marka shuruudaha sharcigu xaddidaan xaqa diidmada daaweynta, xaaladaha iyo duruufaha waa in si buuxda loogu diiwaangeliyo diiwaanka caafimaad ee deggenaha, waxaana qoraya dhakhtarka daawaynaya, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka.

## Cilmi-baaris tijaabo ah

Oggolaansho qoraal ah oo xog-ogaal ah waa in la helaa ka hor inta deggenuhu ka-qaybgalin cilmi-baaris tijaabo ah. Deggenayaashu waxay xaq u leeyihiin inay diidaan ka-qaybgalka. Oggolaanshaha iyo diidmadaba waa in lagu diiwaangeliyo diiwaanka daryeelka ee shakhsiga.

## Ka-xorriyad xadgudub

Deggenayaashu waa inay ka xor ahaadaan xadgudub sida lagu qeexay *Xeerka Ilaalinta Dadka Nugul*. “Xadgudub” waxa loola jeedaa ficillada lagu qeexay qodobka 626.5572, qayb-hoosaadka 15, ama si ula kac ah oo aan daaweyn ahayn loo gaarsiiyo xanuun jireed ama dhaawac, ama falal isdaba-joog ah oo loogu talagalay in lagu abuuro dhib nafsiyeed ama mid shucuureed. Deggenaane kasta waa inuu sidoo kale ka xor ahaadaa xannibaado kiimiko ama jireed oo aan daaweyn ahayn, marka laga reebo xaalado degdeg ah oo si buuxda loo diiwaangeliyey, ama marka qoraal ahaan loo oggolaado ka dib baaritaan uu sameeyo dhakhtarka deggenaha, kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha dhakhtarka, muddo cayiman oo xaddidan gudaheed, oo keliya marka ay lagama maarmaan tahay si looga ilaaliyo deggenaha is-dhaawac ama dhaawac uu gaarsiiyo dadka kale.

## Asturnaanta daaweynta

Deggenayaashu waxay xaq u leeyihiin ixtiraam iyo asturnaan la xiriirta barnaamijkooda daryeelka caafimaad iyo kan shakhsiyeed. Doodaha kiiska, la-tashiyada, baaritaannada, iyo daaweyntu waa sir waana in si qarsoodi ah loo sameeyaa. Asturnaanta waa in la ixtiraamaa inta lagu jiro isticmaalka musqusha, qubayska, iyo hawlaha kale ee nadaafadda shakhsiga, marka laga reebo marka ay lagama maarmaan u tahay badbaadada deggenaha ama bixinta caawimaad.

## Asturnaanta diiwaannada

Deggenayaashu waa in loo xaqiijiyaa in diiwaannadooda shakhsiyeed iyo kuwa caafimaad si qarsoodi ah loo maareeyo, waxayna oggolaan karaan ama diidi karaan in loo sii daayo qof kasta oo ka baxsan xarunta. Deggenayaasha waa in la wargeliyaa marka diiwaannadooda shakhsiyeed uu codsado qof ka baxsan xarunta, waxayna dooran karaan qof la socdo marka diiwaannada ama macluumaadka laga qaadayo wareysi shakhsiyeed. Nuqullo ka mid ah diiwaannada iyo macluumaadka qoraalka ah ee ka imanaya diiwaannada waa in la heli karaa si waafaqsan xaqan iyo qodobada 144.291 ilaa 144.298. Xuquuqdan ma khusayso baaritaannada cabashooyinka iyo kormeerka ay sameyso Waaxda Caafimaadka, marka ay ku khasban yihiin heshiisyada lacag-bixinta dhinac saddexaad, ama marka sharcigu si kale u dhigayo.

## Shaacinta adeegyada la heli karo

Deggenayaasha waa in lagu wargeliyaa, ka hor ama waqtiga gelitaanka iyo inta ay joogaan, adeegyada ku jira qiimaha aasaasiga ah ee maalintii ama qiimaha qolka, iyo in adeegyo kale ay heli karaan oo kharash dheeraad ah leh. Xarumuhu waa inay sameeyaan dadaal kasta oo suurtagal ah si ay uga caawiyaan deggenayaasha helitaanka macluumaad ku saabsan in *Medicare* ama barnaamijka kaalmada caafimaadka ay bixin doonaan dhammaan ama qaar ka mid ah adeegyadaas.

## Adeeg jawaab-celin leh

Deggenayaasha waxay xaq u leeyihiin jawaab degdeg ah oo macquul ah oo laga bixiyo su'aalahooda iyo codsiyadooda.

## Asturnaanta shakhsiyeed

Deggenayaashu waxay xaq u leeyihiin in si buuxda loo tixgeliyo asturnaantooda, shakhsiyaddooda, iyo aqoonsigooda dhaqan, marka ay la xiriirto fayo-qabkooda bulsho, diimeed, iyo nafsiyeed. Shaqaalaha xaruntu waa inay ixtiraamaan asturnaanta qolka deggenaha iyagoo garaacaya albaabka oo raadinaya oggolaansho ka hor inta aysan gelin, marka laga reebo xaalad degdeg ah ama marka ay si cad u habboonayn.

## Cabashooyin

Deggenayaasha waa in la dhiirrigeliyaa lana caawiyaa, inta ay ku jiraan xarunta ama inta ay ku jiraan daaweyntooda, si ay u fahmaan uguna adeegsadaan xuquuqdooda deggenayaal iyo muwaadiniin ahaan. Deggenayaashu waxay soo gudbin karaan cabashooyin waxayna soo jeedin karaan isbeddello ku saabsan siyaasadaha iyo adeegyada shaqaalaha xarunta ama dadka kale ee ay doortaan, iyaga oo ka madax-bannaan xannibaad, faragelin, qasbid, takoorid, ama aargoosi, oo ay ku jirto hanjabaad ka saarid. Ogeysiis ku saabsan habraaca cabashooyinka ee xarunta ama barnaamijka, iyo sidoo kale cinwaannada iyo lambarrada taleefanka ee *Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka* iyo wakiilka *ombudsman*-ka sida ku cad *Xeerka Americans-ka Waayeelka*, qodobka 307(a)(12), waa in lagu dhejiyaa meel si cad loo arki karo.

Xarun kasta oo daryeel aan degdeg ahayn (nonacute care), iyo xarun kasta oo shaqaaleysiisa in ka badan laba qof oo bixisa adeegyo caafimaad maskaxeed oo bukaan-socod ah, waa inay lahaataa habraac cabasho oo gudaha ah oo qoraal ah, kaas oo ugu yaraan qeexaya habka la raacayo; tilmaamaya waqtiyada kama dambaysta ah, oo ay ku jiraan waqtiyada jawaabta xarunta; siinaya deggenaha fursad uu ku helo caawinta qareen-difaace (advocate); ku waajibinaya jawaab qoraal ah cabashooyinka qoraalka ah; iyo hubinaya in go'aan waqti ku habboon uu bixiyo go'aan-qaade aan dhinacna u janjeerin haddii cabashadu si kale loo xallin waayo.

## Asturnaanta isgaarsiinta

Deggenayaasha waxay si gaar ah ula xiriiri karaan oo ula macaamili karaan dadka ay doortaan, waxayna geli karaan kana bixi karaan xarunta sida ay doortaan, marka laga reebo sida uu dhigayo *Xeerka Minnesota ee Gelinta Qasab ah*. Deggenayaashu waxay heli karaan, iyaga oo iska bixinaya kharashka, qalabka wax lagu qoro, waraaqaha, iyo boostada. Warqadaha shakhsiga ah waa in la diraa iyada oo aan faragelin lagu samayn lana helo iyada oo aan la furin, haddii aanay jirin sabab caafimaad ama barnaamij oo ka soo horjeedda taas, isla markaana lagu diiwaangeliyey diiwaanka caafimaad ee dhakhtarka ama kalkaalisada heer sare ee diiwaangashan. Waa in la heli karaa taleefan ay deggenayaashu ku wici karaan kuna heli karaan wicitaanno isla markaana ay si gaar ah ugu hadli karaan. Xarumaha aan awoodin inay bixiyaan meel gaar ah waa inay sameeyaan qabanqaabooyin macquul ah si loo ilaaliyo asturnaanta wicitaannada deggenayaasha.

## Hantida shakhsiyeed

Deggenayaasha waxay haysan karaan oo isticmaali karaan dharkooda iyo alaabtooda shakhsiyeed inta boosku oggol yahay, haddii aysan taasi ku xadgudbayn xuquuqda deggenayaasha kale, isla markaana aanay jirin sababo caafimaad, badbaado, ama barnaamij oo si cad loo diiwaangeliyey oo ka soo horjeeda. Xaruntu waa inay haysataa sanduuq dhexe oo qufulan ama ay bixisaa meelo kaydin oo gaar ah oo qufulan si deggenayaashu ugu kaydsadaan alaabtooda qiimaha leh si ammaan ah. Xaruntu way bixin kartaa magdhow ama beddel alaab luntay ama la xaday, balse sharci ahaan looguma qasbo inay sidaas samayso.

## Adeegyo lagu qabto xarunta

Deggenayaasha waa in aan lagu qasbin inay qabtaan shaqo ama adeegyo loogu adeego xarunta, marka laga reebo hawlo loogu talagalay ujeeddooyin daaweyn ah oo si ku habboon ula xiriira yoolalka lagu qoray diiwaanka caafimaad ee shakhsiga.

## Xulashada bixiyaha

Deggenayaasha waxay iibsan karaan ama kireysan karaan alaabo ama adeegyo aan ku jirin qiimaha maalintii (per diem) iyagoo ka helaya bixiye ay doortaan, haddii uusan sharcigu si kale u dhigin. Bixiyuhu waa inuu hubiyaa in iibsiyadan ay ku filan yihiin inay daboolaan baahiyaha caafimaad ama daaweyn ee deggenayaasha.

## Arrimaha maaliyadeed

Deggenayaasha leh karti buuxda waxay maamuli karaan arrimahooda maaliyadeed ee shakhsiyeed. Haddii ay mas’uuliyaddan u wakiishaan xarunta muddo kasta, sida ku cad shuruucda Minnesota, waa in ugu yaraan saddexdii biloodba mar la siiyo warbixin ku saabsan dhammaan macaamilada maaliyadeed ee lagu sameeyey magacooda.

## Xaqa la-macaamilka iyo la-kulanka

1. Deggenayaasha waxay la kulmi karaan oo soo dhoweyn karaan booqdayaal, waxayna ka qaybqaadan karaan hawlaha ganacsi, diimeed, siyaasadeed—sida lagu qeexay qodobka 203B.11—iyo kooxaha bulshada, iyaga oo aan faragelin lagu samayn, haddii hawlahaasi aysan ku xadgudbayn asturnaanta deggenayaasha kale ama aysan barnaamij ahaan ka soo horjeedin. Tan waxa ka mid ah:
    a. xaqa ay ula midoobi karaan shakhsiyaad kale oo ku jira ama ka baxsan xarunta si ay uga shaqeeyaan horumarinta daryeelka muddada-dheer;
    b. xaqa booqasho uu sameeyo qof uu deggenuhu u magacaabay wakiilkiisa daryeelka caafimaad sida ku cad cutubka 145C;
    c. xaqa booqasho iyo go'aan-qaadasho daryeel caafimaad oo uu sameeyo qof uu deggenuhu u magacaabay sida ku cad farqadda (3).
2. Marka la gelayo xarun uu sharciga federaalku ka mamnuucayo shaacinta aan la oggolayn ee macluumaadka aqoonsiga deggenaha ee loo sheego wiciyeyaasha ama booqdayaasha, deggenuhu—ama ilaaliyaha ama mas'uulka hantida ee deggenuhu—waa in la siiyaa fursad uu ku oggolaado in la shaaciyo joogitaanka deggenaha ee xarunta si loogu sheego wiciyeyaasha ama booqdayaasha doonaya inay la xiriiraan deggenaha. Ilaa inta ay suurtagal tahay, ilaaliyaha ama mas'uulka hantida waa inuu tixgeliyaa aragtida deggenaha ee ku saabsan shaacinta joogitaankiisa ee xarunta.
3. Marka la gelayo xarun, deggenuhu—ama ilaaliyaha ama mas'uulka hantida ee deggenuhu—waa in la siiyaa fursad uu ku magacaabo qof aan qaraabo ahayn oo yeelanaya kaalinta qofka ugu dhow qoyska (next of kin) ee deggenaha marka la eego booqashada iyo go'aan-qaadashada daryeelka caafimaad. Magacaabistan waa in lagu daraa diiwaanka caafimaad ee deggenaha. Marka ay timaaddo go'aan-qaadashada daryeelka caafimaad, *tilmaamaha daryeelka caafimaad* ama magacaabista wakiil daryeel caafimaad sida ku cad cutubka 145C ayaa ka mudnaan leh magacaabista lagu sameeyo farqaddan. Qofka aan qaraabada ahayn waxa sidoo kale aqoonsan kara deggenuhu ama xubnaha qoyska deggenaha

## Golayaasha talo-bixinta

Deggenayaasha iyo qoysaskooda waxay xaq u leeyihiin inay abaabulaan, ilaashadaan, kana qayb qaataan golayaasha talo-bixinta ee deganeyaasha iyo qoysaska. Xarun kasta waa inay bixisaa kaalmo iyo meel lagu qabto kulamada. Kulamada golaha waa in loo sugaa asturnaanta, iyadoo shaqaalaha ama booqdayaashu ka soo qayb geli karaan oo keliya marka goluhu ku casuumo. Qof shaqaale ah ayaa loo magacaabayaa masuuliyadda bixinta kaalmadan iyo ka jawaabidda codsiyada qoraalka ah ee ka dhasha kulamada golaha. Golayaasha deganeyaasha iyo qoysaska waa in lagu dhiirrigeliyaa inay soo jeediyaan talooyin ku saabsan siyaasadaha iyo habraacyada xarunta.

## Adeegyada ilaalinta xuquuqda iyo u-doodista

Deggenayaasha waxay xaq u leeyihiin helitaan macquul ah, waqtiyo macquul ah, oo ku aaddan adeegyada ilaalinta xuquuqda iyo adeegyada u-doodista ee la heli karo, si deggenuhu u helo caawimaad ku saabsan

fahamka, adeegsiga, iyo ilaalinta xuquuqda ku xusan qodobkan iyo sharciyada kale. Xuquuqdan waxa ku jira fursad ay deggenaha iyo wakiilka adeegga ilaalinta xuquuqda ama u-doodista ay si gaar ah ula xiriiri karaan.

Su'aalo ama cabashooyin ku saabsan Baaqa Xuquuqda Daryeelka Caafimaadka ee Deggenayaasha Xarumaha Nolol-Kormeeran ama daryeelka la bixiyo waxaa loo gudbin karaa:

**Office of Health Facility Complaints**
(651) 201-4200/1-800-369-7994
health.ohfc-complaints@state.mn.us
Cinwaanka Boostada:
Minnesota Department of Health
Office of Health Facility Complaints
P.O. Box 64970
St. Paul, MN 55164-0970

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan helitaanka daryeel ama adeegyada barnaamijka waxaa loo gudbin karaa:

**Office of Ombudsman for Mental Health and Developmental Disabilities**
332 Minnesota St.
Suite W1410, First National Bank Building
St. Paul, MN 55101-2117
1-800-657-3506 ama 651-757-1800 (metro)
Office of Ombudsman for Mental Health and Developmental Disabilities (https://mn.gov/omhdd/)
ombudsman.mhdd.@state.mn.us

Minnesota Department of Health
Health Regulation Division
PO Box 64900
St. Paul, MN 55164-0900
651-201-4200
health.fpc-licensing@state.mn.us
www.health.state.mn.us

1/30/2026

*Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, wacl: 651-201-4200*